CENTER FOR INCLUSIVE CHILD CARE

# Talooyin Kooban

Caruurta leh baahiyaha gaarka ah: Isbeddelada

Isbeddelku waa wax caqabad ku ah dad badan, carruurta yaryarna sidoo kale kama duwana. Marka cunugga yar laga filayo inuu joojiyo wuxuu hayay oo ku beddelo wax uu qabanayay mid kale, ama goob tuu joogay ka tago oo meel kale tago, qofka wayn ayay tahay isbedelkaa jawiga inuu u diyaariyo ilmaha.

## Qorshayn iyo Diyaargarow

Aad bay u muhiim tahay in loo diyaar garoobo waqtiga is bedelku jiro ama casharada u dhexeeya si hawshu u fududaato. Intaan marxalad isbedal keenaysa la gudo gelin waa muhiin in aad ka fakarto ama qorto qaab kii ay wax u socon lahaayeen. Qorshee talaabooyinkii la qaadi lahaa intaan la gaarin waqtigii ilmuhu hakad casharku ka geli lahaa ama loo dhiibi lahaa shaqo hor leh.

### Talaabooyinkan ayaa Qaadidoodu tahay Muhiim si Loogu Tabaabushaysto Xiliga Isbedelku Jiro

1. Madaxa ku hay ama ka feker wixii la qaban lahaa si loo gaaro natiijadii la rabay.
2. Isku habee waxyaabihii loo baahnaa oo la adeegsan lahaa si wax walba u hagaagaan. Waxyaabaha loo baahan yahay waxaa ka mid ah qorsheyn iyo haysasho qalabaadka loo adeegsado xiliyadda isbedalku jiro.
3. Qorshaha u sheeg dhamaan intuu khuseeyo.
4. U diyaari ilmaha isbadelka soo socda adigoo adeegsanya waxyaabo maaweeliya sida shay ilmuhu gacanta ku sii qaato, ama lagu daro ilmo amaba qof wayn oo u wehel yeela.

Tusaale ahaan, waxaad qorsheyn inaad tagto baarkiga cunno fududna ilamaha u sii qaado. Hasayeeshee ilmaha aad daryeesho mid ka mid ahi jecel yahay saxan gaar ah oo qal sare leh, ilmahana yahay mid u baahan qalab cawimo.

Maadaama baarkiga marar kale la tegi doono, waxaa loo baahan yahay inaad ku tashato ilmahan saxan la midda kuu jecel yahay loo helo looguna wado  boorsada. Sidaa darteed waad sii weydiin kartaa waalidiinta cunuga inay u keenaan saxan kale oo la midka kuu jeclaa si cuntadda loogu siiyo marka beerta la tagayo.

## Joogtayn

Jadwalka joogtada oo ilmahu ku xisaabtamo maalin walba waxtar ayuu u leeahay dhamaan caruurta gaar ahaan ilmaha caawimadda dheeraadka ah u baahan. Tabaabushadu kaalin wayn ayay ka qaadan maalintu inay si hagaagsan ku socoto, kaas oo xoojin dhammaan waxbarashada maalinta oo dhan.

Tusaale ahaan, nadiifintu waxay ka mid tahay xiliyada bedelka ku keenta ilmaha. Markaad u diyaar garoobayso nadiifinta, waxaad sii wegelin kartaa carruurta si ay ugu diyaar garoobaan hawshaa una joojiyaan wixii ay horey u hayeen. Garaac dawan, ama tus waxay arki karaan sida taswiir ku saabsan diyaargrowga. Sidoo kale xullo dhawaaq soo jeedin kara sida muusikada, hees, ama gambaleele si ay u dareemaan waqtigii nadaafadda in la gaaray.

Marka la gaaro waqtigii nadaafadda la bilaabayay sii hawl cayiman ilmaha sida baaldi ay wax ku qabtaan ama hawl cad oo kale, sida adoo ku leh

"Josie ama Ali, adiga ayaa mas'uul ka ah guridda baloogyada jaalaha ah oo ku ridaya baaldiga."

## Koriimo Qaabilsan Da'da

Jadwal markaad dejinayso ku hay madaxa da'da ilmaha iyo waxay qaban karaan. La soco oo faham heerka koritaanka ilmaha, dabadeedna fahamkaa ku salee wixii ku saabsan kala bedelka jadwalka io macluumaadka la xiriira.

Is weydii:

- Ma khasabaa hadba in la bilaabo ama la joojiyaa macluumaad hor leh?
- Miyaad caruurta weydiisaa inay hadba wax hor leh sameeyaan maalinta gudaheeda?
- Ma suurtowdaa ilmuhu wax badan ciyaarta in ay ku baranayaan marka waqti dheeri ah la siiyo intii hadba hawlaha loo kala bedbadeli lahaa?

Markaan waxyaalahan oo dhan maskaxda ku hayno waxaan arki doonaa horumar wayn oo carruurtu daryeelkeena ku hesho. Waxay dareemi doonaan dareen amni iyo saadaalin u horseeda deggenaansho maalintooda. Tani waxay u oggolaaneysaa iyaga inay sahamiyaan oo ay wax bartaan iyagoo aan ka welwel qabin waxa xiga ee dhacaya.

## Xog dheeraad ah

National Association for the Education of Young Children
http://www.naeyc.org

Zero to Three
https://www.zerotothree.org

*Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo www.inclusivechildcare.org.*

*Xuquuqda daabacaadda © 2025 Xarunta Xannaanada Carruurta Loo Dhan Yahay*

*Qalabkan waxaa laga yaabaa in si xor ah loo soo saaro ujeedooyin waxbarasho. Macluumaadka xaashidan tilmaantu waxay leedahay wax laga beddelay ilo badan.*

*Maalgelinta ay bixiso Waaxda Minnesota Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska.*